

# Foomka Oggolaanshaha Daawada ee Daryeelka Carruurta

## Child Care Medication Authorization Form

Bixiyaha waxbarashada carruurta yaryar waa in uusan wax daawo ah siinin cunug kasta isaga oo aan oggolaansho qoraal ah oo saxiixan ka haysan waalidka ama mas'uulka cunugaasi, waa in uu daawada u siiyaa si waafaqsan tilmaamaha ku qoran summadda daawada, oo waa in uu adeegsadaa aaladaha lagu cabbirro daawooyinka ee ku habboon oo nadiif ah.

Magaca saddexan ee cunugga (magaca koowaad iyo kan dambe):		Taariikhda Dhalashada Cunugga:
Magaca Daawada (sida ku qoran weelka ay daawadu ku jirto):		
Qiyaasta daawada:	Taariikhda Bilowga:	Taariikhda Dhammaadka:
Waa in la siiyaa waqtiyadan soo socda:		
Sababta Daawada Cunugga Loo Siinayo/Baahida Caafimaad:		
Waxyeellada Suurtagalka ah ee ay Daawadu Leedahay:		
Macluumaad Dheeraad ah:		

**Daawooyinka la isku qoro** waa in kaliya la siiyaa cunugga lagu magacaabey riheetada ama warqadda daawada. Daawooyinka la isku qoro waa in lagu summudaa: magaca koowaad iyo kan dambe ee cunugga, taariikhda daawada loo soo qoray, magaca iyo macluumaadka lagala xiriiro xirfadlaha caafimaadka ee u soo qoray, taariikhda dhicitaanka, qaddarka qiyaasta, dhererka waqtiga daawada la siinayo, iyo tilmaamaha siinta iyo kaydinta.

**Daawooyinka aan la isku qorin (la iska soo iibsado)** waa in uu u keenay barnaamijka waxbarashada carruurta yaryar waalidka ama mas'uulka cunugga iyaga oo ku jira baakadka asalka oo ku qoran taariikhda dhicitaanka kuna summadeysan magaca koowaad iyo kan dambe ee cunugga. Waa in kaliya la siiyaa cunugga lagu macaabey summadda ay bixiyeen waalidka ama mas'uulka. Tilmaamaha ku qoran warqadda ku dhegan waa in la raacaa, haddii waalidka ama mas'uulka uu bixiyo qoraalka xirfadlaha caafimaadka mooyee.

Haddii warqadda ku dhegan baakadka aysan ku qorneyn taariikhda dhicitaanka, qaddarka qiyaasta daawada, da'da, iyo dhererka muddada ay tahay in la siiyo daawada, markaa oggolaansho qoraal ah oo ka timid bixiye daryeel caafimaad oo leh awood oggolaansho ayaa loo baahan yahay, iyo sidoo kale oggolaansho qoraal ah oo saxiixan oo ka so socota waalidka ama mas'uulka cunugga. Tani waxaa ka mid ah: faytamiinno, daawooyinka dhirta ah, faloorydh dheeraad ah, daawooyinka dabiiciga ah, iyo kiniiniyada ama jeelka ilko-soo-baxa (kuusha canbarta ee qoorta la surto waa mamnuuc).

Waxaan halkan ugu fasaxayaa shaqaalaha \_\_\_\_\_ in ay daawada u siiyaan sida kor lagu tilmaamay ama ku cad. (magaca barnaamijka/bixiyaha waxbarashada carruurta yaryar)

\_\_\_\_\_  
Saxiixa Waalidka/Mas'uulka

\_\_\_\_\_  
Taariikh

**Qaybtan waa in uu buuxiyaa waalidka ama mas'uulka cunugga, haddii ay ku habboon tahay:**

Aniga, ama qofka aan doortey, ayaa bixiyay tababar ku saabsan habraacyada bixinta daawooyinka ee aqoon gaar ah u baahan oo loogu talagalay cunugeyga oo gaar u ah daawadan xubinkan(xubnahan) shaqaalahan ee soo socda:

\_\_\_\_\_  
Saxiixa Waalidka/Mas'uulka (ama Qofka la doortey) Taariikh

\_\_\_\_\_  
Saxiixa Bixiyaha Waxbarashada Carruurta Yaryar Taariikh